

HALKA MACLUUMAADKA AY KA HELLI KARAAN QOYSASKU

# Waa maxay kansarka carruurta? What is childhood cancer

## Waa maxay kansar?

Unugyadu waa asaaska dhismaha kaas oo sameeya dhamaan xubnaha iyo cadadka jirkeena. Kansarku waa cudur wuxuuna keenaa in jirku u koro si aan la xakamayn karin. Unugyada kansarku way kala qaybiyaan waxayna u koraan si aan ahayn inay u koraan waxayna noolaadaan si ka badan inay u noolaadaan. Unugyada kansarku waxay ku dhici karaan unugyada caadiga ah. Kooxda unugyada kansarka waxaa loogu yeeraa buro (Tumour). Nooc kasta oo ka mid ah kansarka wuxuu leeyahay magaciisa, daaweyntiisa iyo fursadiisa daaweynta.

## Side uga duwan yahay kansarka ilmanimadu kan dadka waaweyn?

Waxyaallaha keena kansarka dadka waaweyn sida sigaarka iyo kiimikalka ma aha waxa sababa kan carruurta. Kansarka carruurta wuxuu ka muuqda meella ka duwan kan dadka waaweynse wax badanaa dhaca maaha. Noocyada ugu badan oo dadka waaweyn waa kan maqaarka, naasaha, baroostaytka, sanbabka iyo mindhicirka. Carruurta, kansarada dhiigga iyo dhuuxa, cadadka qanjidhada, maskaxda, nadaamka neerfayaasha, muruqyada, kelyaha iyo lafta ayaa u badan. Kansarka carruurta wuxuu u badan yahay in wax laga qabto xagga daaweynta marka la dhinac dhigo kan dadka waaweyn guud ahaana, heerka daaweynta carruurta aad ayuu uga sareeyaa kan dadka waaweyn.

**Intaan la socono, ma jiraan wax qofka weyni ama ilmuhu sameeyeen oo keenay ama joojin kara kansark.**



## Waxaa keena kansarka ilmanimada

Waalid badan ayaa la yaaban waxa keena kansarka carruurta. Waxay ka cabsi qabaa inay keentay wax ay sameeyeen ama aanay samayn inuu cudurka keenay. Kansarka kama qaadi karto qofna. Sida aan la socono, waalidka ama ilmuhu ma aanay sababin kamana hortegi karin kansarka. Kama qaadi karto kansarka qof kale. Ma si sax uma aynu naqaan sababta keenta kansarka ilmanimada hore laakiin saynisyahanadu waxay aad isugu dayayaan inay hellaan sababta keenta. Qadar aad u yar oo kansarka ilmanimada hore ayaa la dhaxlaa (waalidka ayaa u gudbiya ilmaha). Haddii aad ka fekerayso ama welwel ka qabto waxa keenay kansarka ilmaha, waa inaad la hadashaa dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka.



Australian & New Zealand  
Childrens Haematology/Oncology Group

Mashruucani waa Deeqda Da'daalka Cancer Australia oo Caawimaya Dadka qaba Kansarka, waxaana kharajkiisa bixisay Xukuumada Australia



**Australian Government**  
**Cancer Australia**